

Codsiga Ka Dhaafitaanka Khidmadda Dugsiga

- WAX Khidmad ah la iskama qaadayo hawlaha inta lagu jiro maalinta caadiga ah ee dugsiga ee fasallada K-6. Khidmadaha hawlaha la qabto ee ka baxsan maalinta caadiga ah ee dugsiga waxaa laga dhaafi karaa khidmadaha.
- Khidmadaha waa la joojin doonaa inta ka dhaafitaanka khidmadda la eegayo iyo inta racfaanka diidmada ka dhaafitaanka khidmadda uu socdo.
- Marka la ansixiyo, khidmadaha dugsiga waa la dhaafi doonaa ilaa xadka lacagta ee LEA ay dejisay, ka dhaafitaanka safarkuna wuxuu ku koobnaan doonaa wax aan ka badnayn laba safar sannadkii ardaygiiba. Waalid/ardayga looma baahna inuu ogolaado qorshe lacag bixin qayb-qayb ah, ama uu saxiixo IOU bedelka ka dhaafidda. Laakiin, LEA waxay bixin kartaa beddel adeeg si loo daboolo shuruudaha khidmadda, ardayga codsanaya ka-dhaafitaanka safar labaad waa inuu dhammaystiraa qorshe hawleed oo ay ku jiraan tabarucaad la xiriira dugsiga.
- Wixii macluumaad dheeraad ah akhri "Ogeysiiska Khidmadaha Dugsiga Fasallada 7-12" ama "Ogeysiiska Khidmadaha Dugsiga Fasallada K-6".

Macluumaadka Ardayga:

Magaca ardayga: _____ Lambarka Ardayga: _____
Cinwaanka: _____
Dugsiga: _____ Heerka fasalka: _____
Magaca waalidka: _____ Lambarka taleefanka: _____

Sababta Ka Dhaafitaanka Khidmadda:

Fadlan calaamadi u-qalmitaanka khuseeya: (1 kaliya ayaa loo baahan yahay)	Xaqiijinta la gudbinayo: *
<input type="checkbox"/> 1. Qoyska ayaa hela - Kaalmo Ku-meel-gaar ah oo loogu talagalay Qoysaska Baahan (TANF), Barnaamijka Shaqada Qoyska (FEP), ama Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP)	• xaqiijinta faa'iidada laga helo Waaxda Adeegyada Shaqaalaha ee Utah muddada lagu codsanayo ka-dhaafitaanka khidmadda taasoo noqon karta qaab sawirka shaashada elektarooniga ah oo go'aaminta u-qalmitaanka ama xaaladda ah.
<input type="checkbox"/> 2. Ardaygu wuxuu qaataa Dakhliga Amniga Dheeraadka ah (SSI) ee naafonimada u qalanta (khidmadaha waa laga dhaafay ardayga naafada ah oo keliya	• dokumentiyada xaqiijinta faa'iidada ee ka imanaya Maamulka Sooshaal Sekeyuiritiga.
<input type="checkbox"/> 3. Ardaygu wuxuu xaq u leeyahay McKinney-Vento.	• lagu xaqiijiyay degmada ama Masuulka Xidhiidhka ee jaartarka McKinney-Vento.
<input type="checkbox"/> 4. Ardaygu wuxuu ku jiraa Daryeelka Korinta Carruurta (isagoo hoos yimaada Utah ama kormeerka dawladda hoose)	• foomka qaadashada ee loo baahan yahay ee qofka dhallinyarada ah ee daryeelka ku jira iyo warqadda diiwaangelinta dugsiga, oo uu bixiyo shaqaale kiis oo ka socda Waaxda Adeegyada Carruurta iyo Qoyska ee Utah ama Waaxda Caddaaladda Dhallinyarada ee Utah.
<input type="checkbox"/> 5. Ardaygu wuxuu ku jiraa Haynta Dawladda	
<input type="checkbox"/> 6. Ardaygu xaq ayuu u leeyahay iyadoo lagu saleynayo xaqiijinta dakhliga qoyska/reerka. Ku soo koob dakhliga bogga 2.	• xaqiijinta dakhliga qoyska oo ah qaab waraaqo mushahar ama canshuur celin ah.

Haddii mid ka mid ah kuwa kor ku xusan uusan khuseyn laakiin aad rabto inaad u codsato ka dhaafitaanka khidmad ah sababo la xiriira duruufo kale oo gaar ah, fadlan ku sheeg sabab(aha) codsiga sanduuga hoose:

U gudbi codsiga la buuxiyay iyo dokumentiyada xaqiijinta* Maamulaha/Agaasimaha Dugsiga ama Maamulaha Khidmadda Dugsiga.

WAXAAN HALKAN KA CADDEYNAYAA IN MACLUUMAADKA IYO DUKUMENTIYADA KU LIFAAQAN EE AAN BIXIYAY AY RUN YIHIIN OO SAX YIHIIN INTA OGAALKAYGA AH.

Taariikh: _____ Saxeexa Waalidka: _____

BUUXI BOGGAN KALIYA HADDII DOORASHADA LAMBAR 6 LAGA XULAY QAYBTA SABABTA KA DHAAFIDA KHIDMADDA

XAQIIJINTA DAKHLIGA DHAMMAAN XUBNAHA QOYSKA:

Dakhliga qoyska waxaa lagu go'aamiyaa iyadoo la isku darayo dhammaan dakhliga qoyska ee ka yimaada dhammaan ilaha ka dibna la barbar dhigayo tirada dadka ku nool guriga. Qeexitaanka qoyska: koox dad ah oo qaraabo ah ama aan qaraabo ahayn oo aan deganayn hay'ad ama guri hoy ah laakiin ku nool hal guri dhaqaale. Taas macnaheedu waa inay guud ahaan ku nool yihiin hal guri oo ay wadaagaan kharashyada sida kirada, adeegyada iyo cuntada.

Ku liis garee dhammaan dakhliga **BIL KASTA** ka hor inta aan waxba laga jarin tiir(ar)ka ku habboon.

Magaca: Koowaad	Awoowga	Dakhliga laga helo Shaqada (kahor inta aan waxba laga jarin)	Benshanka/Hawlgabka Sooshaal Sekeyuuritiga	Caydha, Biilka Xaaska Hore, Biilka Ilmaha, Dakhliga Kale	Wadarta Dakhliga Bishii Qofkiiba
1		\$	\$	\$	\$
2		\$	\$	\$	\$
3		\$	\$	\$	\$
4		\$	\$	\$	\$
Cabbirka qoyska:				Wadarta Dakhliga Bishii ee Qoyska: \$	

TUSAALOYINKA DAKHLIGA:

Dakhliga laga helo Shaqada	Benshanka/Hawlgabka, Sooshaal Sekuuritiga	Caawimo, Biilka Xaaska Hore, Biilka Carruurta	Dakhliga Kale
Mushahar-saacadeed, mushahar iyo gunnooyin, gunnada shaqo la'aanta, magdhawga shaqaalaha, dakhliga saafiga ah laga helo ganacsi aad leedahay ama beer	Benshanka, Dakhliga Sooshaal Sekuuritiga, lacagaha hawlgabka, Sooshaal Sekuuritiga Dakhliga (oo ay ku jirto SSI ilmehelaya)	Lacagaha SNAP, FEP, iyo TANF, lacagaha caydha, biilka xaaska hore, iyo biilka carruurta lacagaha	Gunooyinka naafada; dulsaarka & saamiyada; dakhliga kaa soo gala hantida, hatida cidkale maarayso "trusts", iyo maalgashiga, tabarucaadka joogtada ah ee laga helo dadka aan ku noolayn qoyska dhexdiisa; lacagaha hantida hal abuurka ee saafiga ah iyo heshiis caymis; dakhliga kirada saafiga ah; dakhli kasta oo kale

TILMAAMAHA U-QALMITAANTA DAKHLIGA

Sannad Dugsiyeedka:
Luulyo 1, 2026 - Juun 30, 2027

Cabbirka Qoyska	Sannadkiiba	Bishiiba	Laba Jeer Bishiiba	Labadii Todobaadba Mar	Todobaadkiiba
1	20,748	1,729	865	798	399
2	28,132	2,345	1,173	1,082	541
3	35,516	2,960	1,480	1,366	683
4	42,900	3,575	1,788	1,650	825
5	50,284	4,191	2,096	1,934	967
6	57,668	4,806	2,403	2,218	1,109
7	65,052	5,421	2,711	2,502	1,251
8	72,436	6,037	3,019	2,786	1,393
Xubin kasta oo qoyska ka mid ah oo dheeraad ah, ku dar:	7,384	616	308	284	142

Foomka Go'aanka Ka-Dhaafidda Khidmadda iyo Racfaanka

Ku socoto waalidka ama ilaaliyaha sharciga ee: _____

Arjigaada ka-dhaafidda khidmadda waa:

_____ La ogolaaday - waa laga dhaafi doonaa DHAMAAN khidmadaha sannad dugsiyeedka _____

_____ La soo diiday - sababta soo socoto awgeed:

_____ Cunugaada xaq uma laha sida hoos timaado qeybaha xaq u yeelashada.

_____ Aadan keenin warqadaha loo baahan yahay si loo ogaado haddii cunugaada xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda.

_____ Wax kale: _____

Saxiixa: _____ Taariikhda: _____

(Saxiixa shaqaalaha dugsiya)

XUQUUQDA RACFAANKA WAALIDKA

HADDII AAD QILAAFSAN TAHAY GO'AANKAAN, WAXAAD XAQ U LEEDAHAY IN AAD QAADATID RACFAAN. Si aad racfaan u qaadatid, waxaad warqad (ama foomka Ogeysiiska Racfaanka ee ku daabacan dhanka hoose boggaan) u dirtaa agaasimaha/maamulaha dugsiya gaarka, adiga sharaxa sababta aad u qilaafsan tahay go'aankaan. Ku dar magacaada, magaca cunugaada, iyo taariikhda. **WAA IN AAD RACFAANKAADA KU SOO DIRTAA BOOSTADA AMA AAD KU KEENTAA GACANTA MUDDO TOBAN MAALIN GUDAHOODA LAGA BILAABO MARKA AAD HESHID OGEYSIISKAAN.** Haayso koobiga racfaanka si aad u gashatid diiwaankaada. Wakiil ka socda dugsiya ayaa kula soo xariiri doono muddo labo todobaad gudahooda kaddib marka la helo racfaankaada lana qabto shir looga hadlo arrimahaada. Waxaa kaloo lagu siin doonaa koobiga Siyaasadda Racfaanada Ka-Dhaafidda Khidmadda dugsiyada dagmada/dugsiyada gaarka.

DHAMAAN SHARUUDAHA BIXINTA KHIDMADAHA WAA LA JOOJIN DOONAA ILAA LAGA GAARO GO'AANKA KAMA DAMBAYSTA EE KU SAABSAN RACFAANKAADA.

OGEYSIISKA RACFAANKA

Aniga, _____, waxaan rabaa in aan racfaan ka qaato go'aanka ku saabsan arjigeysiga la xariira ka-dhaafidda khidmadda dugsiya asbaabta soo socoto awgeeda: _____

Magaca cunugeyga waa: _____

Fadlan qabso ballanka shirka si looga hadlo racfaankaan. Aniga waan fahamsanahay in dhamaan khidmadaha la joojin doono ilaa laga gaaro go'aanka kama damabaysta kaddibna cunugeyga awood u yeesho in uu si buuxdo uga qeybgalo dhamaan hawlaha dugsiya waqtigaas sida in la bixiyay khidmadaha.

_____ Taariikhda: _____

(Saxiixa qofka soo gudbiyay racfaanka)

Xariirka Dugsiya: _____ Nambarka Telefoonka: _____

Foomka Heshiiska Adeegga / Qorshe Hawleedka

Sharciga Utah wuxuu dhigayaa in LEA ay u oggolaan karto arday inuu sameeyo adeeg beddelkii khidmad "si loo hubiyo in ardayna aan loogu diidin fursad uu kaga qaybqaato fasal ama waxqabad uu dugsigu maalgeliyo ama la taageero awood la'aantiisa inuu kharashka bixiyo awgeed." Haddii loo bandhigo, ardaygu wuxuu dooran karaa inuu sameeyo adeeg beddelkii khidmad, laakiin **degmo dugsiiyeedku kuma waajibin karto arday inuu sameeyo adeeg beddelkii laga cafin lahaa khidmadda**. Laakiin, arday codsanaya ka dhaafitaan safar labaad oo dugsigu maalgeliyo waa inuu la sameeyaa qorshe hawleed qoran maamulaha si uu gacan uga geysto adeegga dugsiga ama bulshada. Qorshe hawleedka waa in lagu jaangooyaa duruufaha gaarka ah ee ardayga, kartidiisa, iyo helitaanka, waana in loo qaabeeyaa si looga fogaado faragelinta mas'uuliyadaha waxbarasho ama shaqsiyeed ee ardayga.

XADKA KA DHAAFITAANKA KHIDMADDA SAFARKA: Ka dhaafitaanka khidmadaha safarrada uu dugsigu maalgeliyo (safar laba habeen ama ka badan) waxay ku kooban yihiin **ugu badnaan laba safar ardaygiiba sannad dugsiiyeedkiiba**, sida ku xusan Qaybta Xeerka Utah 53G-7-504. Xaddidaaddani ma khusayso safarka la xiriira hawlaha gobolka dhexdiisa ah ee uu maalgeliyo urur, sida ku qeexan Qaybta Xeerka Utah 53G-7-801. Dhammaan ka dhaafitaannada khidmadaha waxa sidoo kale lagu xaddidayaa wadarta guud ee lacagta ee ay ansixisay guddiga maamulka LEA.

Haddii ardaygaagu uu doorto inuu sameeyo adeeg ama uu dhammaystirayo qorshe hawleed safar labaad, waxaa jira ikhtiyaarro aad ka dooran karto inaad ku dhammaystirto adeegga. Ikhtiyaarada adeegga waxaa ka mid noqon kara: Service at the school, such as custodial work, tutorial assistance to other students, or service outside of regular school hours as a student aide to school staff;

- Adeegga dugsiga, sida shaqada xannaanada, caawinta casharrada ardayda kale, ama adeegga ka baxsan saacadaha dugsiga caadiga ah iyadoo ah kaalmo arday uu siinayo shaqaalaha dugsiga;
- Adeegga bulshada sida guriga kalkaalinta ama isbitaalka; ama
- Marka baahiyo gaar ah loo baahdo, guriga ku adeeg.
- Barnaamij kale oo adeeg ama tabarucaad ah oo la xiriira dugsiga oo uu ansixiyey maamulaha ama qofka loo magacaabay.

Heshiiska Adeegga Caadiga ah

Qorshe Hawleedka Safarka Labaad

_____ wuxuu ogolaaday inuu dhammeeyo _____ saacadaha adeegga _____
(Magaca ardayga) (sharax kooban)

In la dhammaystiro ka hor: _____ Tani waxay dabooli doontaa waajibka khidmadda ardayga ee \$ _____
(Taariikh)

Dhammaan adeegyada waxaa lagu xisaabin doonaa qiimaha \$ _____ saacaddii. Marka la dhammeeyo, khidmadaha dugsiga ee ardaygu waxa uu noqon doonaa mid laga dhaafay.

SAXIIXYADA:

Arday: _____ Taariikh: _____

Waalid/Mas'uul: _____ Taariikh: _____

Maamulaha Dugsiga: _____ Taariikh: _____

Dugsigu waa inuu hubiyaa in shaqada loo xilsaaray ay ku habboon tahay da'da ardayga, xaaladda jireed ee ardayga, iyo bisaylka ardayga. Shaqadan waa inay sidoo kale la jaanqaaddaa sharciyada gobolka iyo kuwa federaalka, oo ay ku jiraan Xeerka Heerarka Shaqada ee Federaalka ee Caddaaladda ah. Tani waxay u baahan tahay in adeegga la qabto 1) muddo macquul ah gudaheed, 2) saacad kasta oo adeeg ah waxaa lagu xisaabiyaa ugu yaraan lacag la mid ah mushaharka ugu yar ee hadda jira, iyo 3) saacadaha adeegga ee la shaqeeyo maalin kasta iyo toddobaadkasta waa xaddidan yihiin iyadoo loo eegayo da'da ardayga.

Tusaale ahaan, haddii arday lagu qiimeeyo \$100 khidmadaha dugsiga siyaasadda dugsiguna ay ku salaysan tahay \$10 saacaddii oo ah dhibcaha adeeg, markaa ardayga waxaa laga yaabaa in la weydiisto inuu qabto ilaa 10 saacadood oo adeeg ah.

Shaqooyinka adeegga waa in loo qabtaa si aan ardayda loogu ceebayn, loogu jeesjeesin, ama loogu ceebayn, oo aan loo siinin faa'iido gaar ah oo toos ah shaqaalaha dugsiga ama qoysaskooda. Intaa waxaa dheer, hawlaha adeegga waa inay ka fogaadaan culays xad dhaaf ah oo saaran ardayda iyo qoysaska isla markaana ay si habboon u tixgeliyaan baahiyaha waxbarasho iyo gaadiid iyo mas'uuliyadaha kale ee ardayga.

Haddii ay soo baxaan duruufo aad ugu adkaynaya ardayga inuu dhammaystiro hawsha adeegga, isla markiiba u sheeg maamulaha dugsiga si uu u go'aamiyo wixii hagaajin ah ee la samaynayo.

Ardayda adeegga looma tixgelin doono inay yihiin shaqaalaha kuwa ay adeegga u fidiyaan, lacagna looma siin doono ardayda ama dugsiga si loogu beddelo adeegga. Shaqaalaha caadiga ah ee ka shaqeeya meelaha ay ardaydu ku qabtaan adeegyada lama beddeli karo, mana la dhimi karo saacadaha shaqada, taasoo ka dhalatay hawlaha adeegga ee ardayda. Adeeggu waxaa loogu talagalay inuu kabo adeegyada jira, ee ma aha inuu beddelo kuwa ay hore u sameeyaan dadka kale.

Xaqiijinta Adeegga:

Goobta Adeegga: _____ Adeegga la Qabtay: _____

Kormeeraha: _____ Saacadaha: _____

Taariikhda Bilaabmida: _____ Taariikhda Dhammaadka: _____

Goobta Adeegga: _____ Adeegga la Qabtay: _____

Kormeeraha: _____ Saacadaha: _____

Taariikhda Bilaabmida: _____ Taariikhda Dhammaadka: _____

_____ wuxuu dhammeeyay dhammaan saacadaha adeegga sida kor ku xusan, wuxuuna
(Magaca ardayga)

fuliyay dhammaan wixii lagu heshiiyay saacadaha adeegga ilaa inta ugu macquulsan ee suurtoogalka ah iyadoo loo eegayo duruufaha shaqsiyeed ee ardayga iyo dugsiga labadaba.

Waalid/Mas'uul: _____ Taariikh: _____

Kormeeraha: _____ Taariikh: _____

Waxaan dib u eegay adeegga la bixiyay waxaana Kormeeraha u xaqiijiyay in dhammaan adeegga la dhammeeyay sida kor ku xusan ilaa inta ugu macquulsan ee suurtoogalka ah iyadoo loo eegayo duruufaha shaqsiyeed ee ardayga iyo dugsiga labadaba. Sidaa darteed, sida lagu heshiiyay, khidmadaha gaarka ah ee la xiriira heshiiskan adeegga waa la dhaafay.

Maamulaha Dugsiga: _____ Taariikh: _____

limayl: _____

Taleefanka: _____

Websaytka: _____

Ogeysiiska Khidmadaha Dugsiga ee Qoysaska Ardayda Fasallada K-6

Dastuurka Utah wuxuu mamnuucayaa in laga qaado khidmadaha dugsiyada hoose.

Haddii ilmuhu dhigto fasalka xanaanada ilaa fasalka lixaad, laguma soo dalaci karo kharashka buugaagta waxbarashada, qalabka fasalka ama agabka, qalabka muusikada, safarrada bannaanka, isku-imaatinada, cuntooyinka fudud (marka laga reebo cuntada lagu bixiyo Barnaamijka Qadada Dugsiga), ama wax kasta oo kale oo dhaca ama la isticmaalo inta lagu jiro maalinta caadiga ah ee dugsiga.

Khidmadaha waxaa lagu qaadi karaa oo keliya barnaamijyada la bixiyo ka hor ama ka dib dugsiga, ama inta lagu jiro fasaxyada dugsiga. Khidmadaha ayaa sidoo kale laga qaadi karaa ardayga dhigta fasalka lixaad oo dhigta dugsi leh hal ama in ka badan oo fasallo 7-12 ah, haddii dugsi raaco qaab dugsi sare oo waxbarashada loogu fidiyo ardayda fasalka lixaad ee dugsiga.

Sharciga Utah wuxuu uga baahan yahay dugsiyada qaada khidmadaha, inay hubiyaan in ka dhaafitaan khidmad ama qodob kale oo beddel u ah ka dhaafitaanka khidmadaha ay heli karaan arday kasta oo waalidkiis uusan awoodin inuu bixiyo khidmadda.

Ka dhaafitaannada Khidmadda

Ka dhaafitaanka khidmadda waa ka-dhaafitaan shuruudda ah in la bixiyo khidmadda. Haddii ardaygu u qalmo ka dhaafitaan khidmad ah, **khidmadaha waa in la dhaafaa, iyadoo ku xiran xadka lacagta dugsiga ee wadarta guud ee ka dhaafitaanka khidmadaha iyo xadka ka dhaafitaanka safarka.**

Ka dhaafitaanka khidmadaha safarrada laba habeen ama ka badan ee dugsi maaligeliyo waxay ku kooban yihiin laba safar sannadkiiba ardaygii. Ka dhaafitaan safar labaad ayaa la codsan karaa iyadoo lala kulmayo maamulaha ama qofka loo xilsaaray si loo sameeyo qorshe hawleed oo dugsi ansixiyay.

Ardaygu wuxuu xaq u leeyahay ka-dhaafitaan haddii:

- qoyskiisu uu qaato lacagta TANF ama SNAP (food stamp (kaalmada cuntada) ama Barnaamijka Shaqada Qoyska ee gobolka, Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah);
- ardaygu uu qaato SSI (Dakhliga Dammaanadda Dheeraadka ah);
- ardayga lagu qoray McKinney-Vento;
- ardaygu uu ku jiro daryeelka korinta;
- ardaygu uu ku jiro gacanta dawladda; ama
- ardaygu uu xaq u leeyahay iyadoo lagu saleynayo dakhliga qoyska/reerka (heerarku waxay la mid yihiin kuwa u-qalmitaanka qadada bilaashka ah).

* *Ardaygu wuxuu sidoo kale xaq u yeelan karaa in laga dhaafo khidmadaha haddii uusan buuxin mid ka mid ah heerarkan laakiin uusan weli awoodin inuu bixiyo khidmad. Fadlan eeg siyaasadda dugsiga ama degmo-dugsiyeedka deegaanka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.*

Haddii ardaygu rabo inuu codsado ka dhaafitaan khidmadda ah, waxaa laga codsan doonaa inay keenaan dukumentiyada muujinaya u-qalmitaanka ka dhaafitaanka khidmadda oo qayb ka ah habka codsiga.

Si uu u codsado ka dhaafitaan khidmad ah, ardaygu wuxuu soo gudbin karaa "Codsiga Ka Dhaafitaanka Khidmadda Dugsiga". Nuqul ka mid ah codsiga ayaa lagu daray ogeysiiskan, nuqullo dheeraad ahna waxaa laga heli karaa xafiiska dugsiga, ama bogga internetka ee khidmadaha dugsiga ee gobolka oo ku taxan dhammaadka dukumeentigan. Marka dukumeentiyada loo gudbiyo dugsiga, shuruudaha khidmadda waa la hakin doonaa ilaa laga gaaro go'aan kama dambays ah oo ku saabsan u-qalmitaanka ardayga ee ka-dhaafitaanka khidmadaha.

Haddii codsiga la diido, dugsi wuxuu soo diri doonaa "Foomka Go'aanka iyo Racfaanka". Foomku wuxuu sharixi doonaa sababta codsiga loo diiday iyo sida racfaan looga qaadan karo go'aanka. Xasuuso inaad had iyo jeer haysato nuqul. Haddii racfaanka diidmada ka dhaafitaanka khidmadda la gudbiyo, dhammaan khidmadaha looma baahna in la bixiyo ilaa racfaanka laga gaadho go'aan.

Haddii ardaygu rabo inuu sawirada dugsiga, buugaag-sanadeedka, ama waxyaabo la mid ah ka iibsado dugsiga, kharashaadkaasi ma aha khidmado mana laga dhaafi doono. Sidoo kale, haddii arday uu lumiyo ama uu waxyeleeyo hantida iskuulka, kharashka beddelka ama hagaajinta ma aha khidmado oo laga dhaafi maayo.

Deeqaha, Sirta, iyo Fulinta Khidmadaha

Lacagta dugsigu waa kooban tahay, dugsiguna wuxuu u baahan karaa caawimo khidmadaha dheeraad ka ah. Sidaas darteed, dugsigu wuxuu codsan karaa deeqo canshuur laga jari karo oo ah agabka dugsiga, qalabka, ama lacagta, laakiin dugsigu ma waajibin karo deeqo.

Magaca ardaygu waa qarsoodi mana loo sheegi karo qof kasta oo aan lahayn xuquuq iyo baahi uu ku ogaado macluumaadka, iyadoon loo eegin haddii ardaygu bixiyay khidmado, deeqo, iyo tabarucaad iyo in kale, ama uu codsaday, helay, ama loo diiday ka dhaafitaan. Laakiin, dugsigu isagoo oggolaansho ka helaya deeq-bixiyaha, siin karaa aqoonsi ku habboon qof kasta ama urur kasta oo deeq weyn ama tabarucaad u sameeya dugsiga.

Shaqaalaha dugsiga iyo dugsigu kama celin karaan, kama dhimi karaan, ama uma kordhin karaan darajooyinka ama dhibcaha, umana diidi karaan darajooyinka, jadwalka fasalka, dhibcaha, kaararka warbixinta, qoraallada diiwaangelinta, ama dibloomada si loo dhaqan geliyo bixinta khidmadaha.

Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir:

Dugsiga deegaanka:

Magaca: _____ Taleefanka: _____

limayl: _____ Websaytka: _____

Cidda Laga La Xidhiidhayo Khidmadaha Dugsiga Degmada/Jaartarka:

Magaca: _____ Taleefanka: _____

limayl: _____ Websaytka: _____

Ogeysiiska Khidmadaha Dugsiga ee Qoysaska Ardayda Fasallada 7-12

Sharciga Utah wuxuu u oggolaanayaa dugsiyada inay qaadaan khidmadaha fasallada toddobaad ilaa laba iyo tobnaad.

Ardayga waxaa laga yaabaa in laga qaado khidmadaha ka qaybgalka fasallada dugsiga, hawlaha iyo barnaamijyada. Ardayga lagama codsan karo ama loogama baahan karo inuu bixiyo wax khidmad ah ilaa codsigaas ama shuruudahaas ay ansixiyaan Guddiga Waxbarashada ee deegaanka oo lagu daro jadwalka khidmadaha dugsiga ama degmada.

Sharciga Utah wuxuu uga baahanyahay dugsiyada qaada khidmadaha inay hubiyaan in ka dhaafitaan khidmad ama qodobo kale oo beddel u ah ka dhaafitaanka khidmadaha ay heli karaan arday kasta oo qoysaskiisu ayna awoodin inay bixiyaan khidmadda.

Qeexidda Khidmadda

Khidmad waxaa lagu qeexaa wax qiimo lacageed leh oo dugsigu codsado ama uga baahdo ardayga si uu uga qaybqaato hawl, fasal, ama barnaamij uu bixiyo, uu kafaalo qaado, ama uu taageero dugsiga, dugsiga jaartar ah, ama degmo. Codsigan ama shuruudahan sidoo kale waa la maldihi karaa. Taas macnaheedu waa haddii wax aan loogu baahnayn ka qaybgalka, laakiin weli la filayo in ardaygu haysto shaygaas, waxay noqonaysaa khidmad dugsiga. Hoos waxaa ku qoran tusaalooyin qaar oo ah khidmadaha:

- | | | |
|--|--|--|
| <ul style="list-style-type: none">Ganaaxyada maqnaanshaha | <ul style="list-style-type: none">Kharashyada safarrada fasalka ama kooxda (oo ay ku jiraan qolka, qaabilaadda, iyo cuntada) | <ul style="list-style-type: none">Khidmadaha barnaamijka dugsiga kadib |
| <ul style="list-style-type: none">Khidmadda ka qaybgalka | <ul style="list-style-type: none">Khidmadaha gelitaanka riwaayadaha dugsiga ama ciyaaraha | <ul style="list-style-type: none">Kiraysiga qalabka |
| <ul style="list-style-type: none">Barnaamijyada sixitaanka | <ul style="list-style-type: none">Kharashka rugta caafimaadka xagaaga ee kubadda cagta | |

Kharashka faraantiga fasalka, buugaag-sanadeedka, sawirrada dugsiga, jaakadaha isboortiga, iyo waxyaabaha la midka ah maaha khidmado mana la dhaafi doono. Sidoo kale, haddii arday uu lumiyo ama uu waxyeelleeyo hantida iskuulka, kharashka beddelka ama hagaajinta ma aha khidmado mana la dhaafi doono.

Ardayda waxaa laga yaabaa in looga baahdo inay bixiyaan khidmadaha koorsooyinka isdiiwaangelinta isku marka ah ama imtixaanada meelaynta sare. Qaybta khidmadaha la xiriirta gaar ahaan darajooyinka ama dhibcaha kuliayadda ama dugsiga sare kadib lama dhaafi karo. Laakiin, Guddiga Kulliyadda waxay ka siiyaan qiimo dhimis kharashyadan kuwa u qalma.

Ka dhaafitaannada Khidmadda

Ardaygu wuxuu xaq u leeyahay ka-dhaafitaan haddii:

- qoyskoodu uu qaato lacagta TANF ama SNAP (food stamp (kaalmada cuntada) ama Barnaamijka Shaqada Qoyska ee Gobolka, Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah);
- ardaygu uu qaato SSI (Dakhliga Dammaanadda Dheeraadka ah);
- ardayga lagu qoray McKinney-Vento;
- ardaygu uu ku jiro daryeelka korinta;
- ardaygu uu ku jiro gacanta dawladda; ama
- ardaygu uu xaq u leeyahay iyadoo lagu saleynayo dakhliga qoyska/reerka (heerarku waxay la mid yihiin kuwa u-qalmitaanka qadada bilaashka ah).

Ka dhaafitaanka khidmadda waa ka-dhaafitaan shuruudda ah in la bixiyo khidmadda. Haddii ardaygu u qalmo ka dhaafitaan khidmad ah, **khidmadaha waa in la dhaafaa, iyadoo ku xiran xadka lacagta dugsiga ee wadarta guud ee ka dhaafitaanka khidmadaha iyo xadka ka dhaafitaanka safarka.**

Ka dhaafitaanka khidmadaha safarrada laba habeen ama ka badan ee dugsigu maalgeliyo waxay ku kooban yihiin laba safar sannadkiiba ardaygii. Ka dhaafitaan safar labaad ayaa laga codsan karaa iyadoo lala kulmayo maamulaha ama qofka loo xilsaaray si loo sameeyo qorshe hawleed uu dugsigu ansixiyay.

** Ardaygu wuxuu sidoo kale xaq u yeelan karaa in laga dhaafdo khidmadaha haddii uusan buuxin mid ka mid ah heerarkan laakiin uusan weli awoodin inuu bixiyo khidmad. Fadlan eeg siyaasadda dugsiga ama degmo-dugsiiyeedka deegaanka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.*

Ka dhaafitaannada Khidmadaha sii socota

Haddii ardaygu rabo inuu codsado ka dhaafid khidmad ah, waxaa laga codsan doonaa inay keenaan dukumentiyada muujinaya u-qalmitaanka ka dhaafitaanka khidmadda oo qayb ka ah habka codsiga.

Si uu u codsado ka dhaafitaanka khidmad ah, ardaygu wuxuu soo gudbin karaa "Codsiga Ka Dhaafitaanka Khidmadda Dugsiga". Nuqul ka mid ah codsiga ayaa lagu daray ogeysiiskan, nuqullo dheeraad ahna waxaa laga heli karaa xafiiska dugsiga, ama bogga internetka ee khidmadaha dugsiga ee gobolka oo ku taxan dhammaadka dukumeentigan.

Marka dukumeentiyada loo gudbiyo dugsiga, shuruudaha khidmadda waa la hakin doonaa ilaa laga gaaro go'aan kama dambays ah oo ku saabsan u-qalmitaanka ardayga ee ka-dhaafitaanka khidmadaha.

Haddii codsiga la diido, dugsigu wuxuu soo diri doonaa "Foomka Go'aanka iyo Racfaanka". Foomku wuxuu sharixi doonaa sababta codsiga loo diiday iyo sida racfaan looga qaadan karo go'aanka.

Xasuuso inaad had iyo jeer haysato nuqul. Haddii racfaanka diidmada ka dhaafitaanka khidmadda la gudbiyo, dhammaan khidmadaha looma baahna in la bixiyo ilaa racfaanka laga gaadho go'aan.

Deeqaha, Sirta, iyo Fulinta Khidmadaha

Lacagta dugsigu waa kooban tahay, dugsiguna wuxuu u baahan karaa caawimo Khidmadaha dheeraad ka ah. Sidaas darteed, dugsigu wuxuu codsan karaa deeqo canshuur laga jari karo oo ah agabka dugsiga, qalabka, ama lacagta, laakiin dugsigu ma waajibin karo deeqo.

Magaca ardaygu waa qarsoodi mana loo sheegi karo qof kasta oo aan lahayn xuquuq iyo baahi uu ku ogaado macluumaadka, iyadoon loo eegin haddii ardaygu bixiyay khidmado, deeqo, iyo tabarucaad iyo in kale, ama uu codsaday, helay, ama loo diiday ka dhaafitaan. Laakiin, dugsigu isagoo oggolaansho ka helaya deeq-bixiyaha, siin karaa aqoonsi ku habboon qof kasta ama urur kasta oo deeq weyn ama tabarucaad u sameeya dugsiga.

Shaqaalaha dugsiga iyo dugsigu kama celin karaan, kama dhimi karaan, ama uma kordhin karaan darajooyinka ama dhibcaha, umana diidi karaan darajooyinka, jadwalka fasalka, dhibcaha, kaararka warbixinta, qoraallada diiwaangelinta, ama dibloomada si loo dhaqan geliyo bixinta khidmadaha.

Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir:

Dugsiga deegaanka:

Magaca: _____ Taleefanka: _____

limayl: _____ Websaytka: _____

Cidda Laga La Xidhiidhaya Khidmadaha Dugsiga Degmada/Jaartarka:

Magaca: _____ Taleefanka: _____

limayl: _____ Websaytka: _____